

A Tourist Handbook

*The Modern*

# **English - Somali**

## **Phrase Book**

*By*

*Ahmed F. Ali « Idaajaa »*

*&*

*Omar Au Nuh*

A Tourist Handbook

*The Modern*

# **English - Somali**

## **Phrase Book**

*By*

*Ahmed F. Ali « Idaajaa »*

*&*

*Omar Au Nuh*

## INTRODUCTION

*Somali is justly considered as one of the richest languages of the world. But in spite of that fact it was not possible for the linguistic quarters to discover it save but a few of whom we are obliged to mention Dr. B. W. Andrzejewski and I. M. Lewis of London University. These two professors have endeavoured to make Somali language and literature known to the outside world after they have realized that it deserves their attention and serious research.*

*After being officially written and firstly introduced in 1973, many foreigners showed their desire to learn Somali. For this reason, we saw it wise to create a competition on the field of translation which is not common in our country. As a result of this, this very simple hand-book was compiled on this basis. We intend neither to teach Somali nor English but help a bit those Foreign visitors or tourists who come to Somalia for the first time and had not the opportunity of learning Somali before.*

*We hope that this humble work will be found of service to those outsiders who are interested in language learning as well as to those Somali-speaking students of English who might have some difficulty in expressing themselves correctly in the language now ranked as the first in the universally spoken languages of the world*

# THE SOMALI SCRIPT AND PRONOUNCIATION

## I. LETTER VOWELS :

There are five short vowels and other five long ones in Somali. They are pronounced as in the following English words :-

### SHORT VOWELS

"A" pronounced as "a" in the English word "at".

"E" » » "e" » » » "bet".

"I" pronounced as "i" in the English word "lip".

"O" » » "o" » » » "lot"

"U" » » "u" » » » "put".

### LONG VOWELS :

"AA" pronounced as "a" in the English word "lab".

"EE" » » "ai" » » » "chair".

"II" » » "ee" » » » "feet"

"OO" » » "a" » » » "call"

"UU" » » "oo" » » » "roof"

## II. CONSONANTS :

Consonants in Somali are for the most part the same as in English except for the following :

"J" Pronounced as in "Jet".

"G" » » "Pagan".

"X" » » the Arabic letter ..... « ح »

"Q" » » » » » ..... « ق »

"C" » » » » » ..... « ع »

"Kh" » » in "Khakhi" or "Khan"

"Dh" has an equivalent neither in English nor in Arabic and it is imperative to hear it from a fluent Somali speaker, or rather from a native speaker.

### N. B.

1. Adjectives usually follow the noun, e.g. Nin weyn (great man), buug yar (little book), kursi madaw (black chair) etc.
2. There is no indefinite article in Somali as in English.

T H I S (male)

*This is a pen*  
*This is a book*  
*This is a chair*  
*This is a table*  
*This is a house*

T H I S (female)

*This is a girl*  
*This is a watch*  
*This is a cupboard*  
*This is a paper*  
*This is a window*

T H E S E

*These are pens*  
*These are chairs*  
*These are tables*  
*These are houses*  
*These are books.*

K A N

Kani waa qalin  
 Kani waa buug  
 Kani waa kursi  
 Kani waa miis  
 Kani waa guri

T A N

Tani waa gabar  
 Tani waa saacad  
 Tani waa armaajo  
 Tani waa xaashi  
 Tani waa dariishad

K U W A N

Kuwani waa qalmaan  
 Kuwani waa kuraasi  
 Kuwani waa miisas  
 Kuwani waa guryo  
 Kuwani waa buugag.

*N.B : Instead of "this" one can use "that", and "these" could be replaced by "those" with no change of the sentence build up.*

*F.G : "Kan" waxa lagu beddeli karaa "Kaas" "tan" waxa lagu beddeli karaa "taas"; "kuwan" waxa lagu beddeli karaa "kuwaas" ayadoon jumlada waxba iska beddelin.*



SOME QUESTIONS

S U ' A A L O

*Is this a pen ?*

*Yes, it is a pen.*

*Is this a watch ?*

*Yes, it is a watch.*

*Is this a letter ?*

*Yes, it is a letter.*

*Is this a chair ?*

*Yes, it is a chair.*

*Are these chairs ?*

*No. They are not chairs.*

*They are tables.*

*Are these books ?*

*No. These are not books.*

*These are papers.*

*Are these watches ?*

*No. These are not watches.*

*These are pens.*

Kani ma qalin baa ?

Haa, waa qalin.

Tani ma saacad baa ?

Haa, waa saacad.

Tani ma warqad baa ?

Haa, waa warqad.

Kani ma kursi baa ?

Haa, waa kursi.

Kuwani ma kuraasi baa ?

Ma. Kuraasi ma aha.

Waa miisas.

Kuwani ma buugag baa ?

Maya Kuwani buugag ma aha.

Kuwani waa xaashiyo.

Kuwani ma saacadaa ?

Maya. Kuwani saacado ma aha.

Kuwani waa qalimo.

SOME ADJECTIVES

TILMAAMEYAAL

*This is a big box.*

*That is a new chair.*

*That is a white cloth.*

*This is a red shirt.*

*Is this a new box ?*

*No. This is a big box.*

*Is that a white chair ?*

*No. That is a new chair.*

*Is that a red cloth ?*

*No. That is not a red cloth.*

*That is a white cloth.*

*Is this a big shirt ?*

*No. This is not a big shirt.*

*This is a red shirt.*

*This box isn't big.*

Kani waa sanduuq weyn.

Kaasi waa kursi cusub.

Taasi waa maro cad.

Kani waa shaati guduudan.

Kani ma sanduuq cusub baa ?

Maya. Kani waa sanduuq weyn.

Kaasi ma kursi cad baa ?

Maya. Kaasi waa kursi cusub.

Taasi ma maro guduudan baa ?

Maya. Taasi ma aha maro guduudan.

Taasi waa maro cad.

Kani ma shaati weyn baa ?

Maya. Kani ma aha shaati weyn.

Kani waa shaati guduudan

Ma weyna sanduuqani.

*This chair isn't new.  
That cloth isn't white.  
That shirt isn't red.*

### WHAT IS THIS ?

*What is this ?  
This is a shirt.  
It is a shirt.  
Is't white ?  
Yes, it is.  
No, it isn't.  
is't new ?  
No, it is old.  
Is't clean ?  
No, it is dirty.  
What is this ?  
This is a shop.  
Is the shop open ?  
No, it is closed.*

1. *In Somali, no matter whether the noun or the negative word is put first.*

Ma cusba kursigaani.  
Ma cadda maradaasi.  
Ma guduudna shaatigaasi.

### KANI WAA MAXAY

Kani waa maxay ?  
Kani waa shaati.  
Waa shaati.  
Ma cad yahay  
Haa, waa cad yahay.  
Maya. ma cadda.  
Ma cusub yahay ?  
Maya, waa duug.  
Ma nadiif baa ?  
Maya, waa wasakh.  
Kani waa maxay ?  
Kani waa dukaan.  
Dukaanku ma furan yahay ?  
Maya, waa xiran yahay

1. Af Soomaaliga waxba kuma jabna haddii magaca laga hor mariyo erayga diidmada ah.

### W H O (male)

*Who is this man ?  
This is Axmed  
Where is he going to ?  
He is going to the Mosqu  
Who is with him ?  
He is alone.  
Ali is with him.*

### W H O (female)

*Who is that woman ?  
She is Asha.  
What is she doing ?  
She is smoking.  
Is she a teacher ?  
No, she isn't. She is a clerk.*

### K U M A

*Waa kuma ninkani ?  
Kani waa Axmed  
Halkee buu ku socdaa ?  
Wuxuu ku socdaa Masa-  
ajidka.  
Yaa la socda ?  
Waa keligii.  
Cali baa la socda.*

### T U M A

*Waa tuma naagtaasi ?  
Waa Caasha.  
Maxay samaynaysaa ?  
Sigaar bay cabbaysaa.  
Ma macallimad baa ?  
Maya, ma aha. Waa karra-  
aniyad.*

W H I C H

<i>To which school do you go ?</i>	Dugsigee baad dhigataa ?
<i>To which Bar shall we go ?</i>	Baarkee baynu aadnaa ?
<i>Which of the two would you prefer ?</i>	Labada kee <u>jeclaan</u> lahayd ?
<i>That is the book which I like best.</i>	Kaasi waa buugga aan ugu jeclahay.
<i>Which of these watches shall I buy ?</i>	Saacadahaan tee gataa ?

PRONOUNS

<i>I am sick.</i>	Waan bukaa (anigu)
<i>You are short.</i>	Waad gaaban tahay (adiga)
<i>He is a man.</i>	Waa nin (isagu)
<i>She is fat.</i>	Wey buuran tahay (iyadu)
<i>We are Somalis</i>	Soomaali baannu nahay (annagu)
<i>We are Moslems.</i>	Muslin baannu nahay.
<i>They are students.</i>	Iyagu waa arday.
<i>You are whites.</i>	Waad caddihiin (idinku)
<i>He and she are friends</i>	Isaga iyo iyadu waa saaxiib.

K E E

*They speak Somali.*

*We are laughing.*

*Are you Chinese ?*

*No, we're Americans.*

*It is a cat.*

*It comes here everyday.*

*It is a beautiful one.*

*Does he speak french ?*

*Yes, he does.*

*Is she a soldier ?*

*No, she is not, She is a poet.*

T B O U T F O O D a n d M E A L S

*Breakfast*

*In the morning*

*We have breakfast in the morning.*

*Iyagu af Soomaaliga way ku hadlaan.*

*Waannu / waynnu qoslaynaa (annagu/innagu).*

*Idinku ma waxaad tihiin Shiine ?*

*Maya, waxaannu nahay Maraykan.*

*Waa mukulaal (iyadu).*

*Maalin kasta halkan bay timaaddaa (iyadu).*

*Waa mid qurxoon (iyadu).*

*Af Faransiiska ma yaqaan (isagu) ?*

*Haa, waa yaqaan.*

*Ma askariyad baa (iyadu) ?*

*Maya, ma aha. Waa gabyaa (iyadu).*

C U N N A D A

*Quraac*

*Aroortii*

*Aroortii baannu quraacanna.*



Tea	Shaah
Water	Biyo
Afternoon	Galab
<i>They drink tea and water in the afternoon.</i>	Galabtii shaah iyo biyo bay cabbaan.
Eggs	Ukun
<i>We have eggs with the tea.</i>	Shaaha ukun baannu ku cunnaa.
Milk	Caano
Lunch	Qado
Meat	Hilib
Rice	Bariis
Supper	Casho
Bread	Rooti (muufo)
<i>We have bread and meat for lunch, rice and milk for supper.</i>	Rooti iyo hilib baannu ku qadeynaa, Bariis iyo caanana waannu ku casheynaa.
<i>Indians like rice.</i>	Bariiska Hindidaa jecel.
<i>I don't drink milk for lunch.</i>	Caano kuma qadeeyo.
<i>Usually, we have only bread and tea for supper.</i>	Inta badan, rooti iyo shaah keliya baannu ku casheynaa.

Coffee	Qaxwe (hun)
<i>Children are not given coffee.</i>	Carruurta qaxwe lama siiyo.
Vegetables	Khudaar (khudrad)
<i>Vegetables are good food</i>	Khudaartu waa cunto fiican.
Banana	Moos (muus)
Sweet banana	Moos macaan.
Mango	Cambe
A mango tree	Geed cambe ah.
Soup	Maraq (fuud)
<i>People like to drink soup</i>	Dadku waxay jecel yihiin inay maraq cabbaan.
Bitter	Kharaar
Orange	Liin
Plate	Saxan
<i>The bitter orange is in the plate.</i>	Liinta Kharaari waxay ku jirtaa saxanka.
Spoon	Qaaddo (fandhaal)
Full	Buuxa
Empty	Maran
Cup	Koob

<i>Sharp</i>	Afaysan
<i>Knife</i>	Mindi
<i>A plate full of rice</i>	Saxan bariis ka buuxo.
<i>She has an empty cup</i>	Waxay haysaa koob maran
<i>A sharp knife is on the plate</i>	Mindi afaysan baa saxanka saaran.
<i>I never eat <del>with spoon</del></i>	Weligey qaaddo wax kuma cuno.
<i>Here is a clean spoon</i>	Halkan waxa taal qaaddo nadiif ah.
<i>Fork</i>	Fargeeto
<i>Kitchen</i>	Jiko (madbakh)
<i>Basket</i>	Dambiil (kolay)
<i>Botato</i>	Batatao (baradho)
<i>The fork is in the kitchen</i>	Fargeetadu waxay taal jikada.
<i>The botato is in the basket</i>	Bataatadu waxay ku jirtaa dambiisha.
<i>I don't know cooking the botatoes.</i>	Bataatada ma <u>karin</u> aqaan
<i>The kitchten is clean and beautiful</i>	Jikadu waa nadiif qurxoon.

<i>One</i>	1	Kow
<i>Two</i>	2	Laba
<i>Three</i>	3	Saddex
<i>Four</i>	4	Afar
<i>Five</i>	5	Shan
<i>Six</i>	6	Lix
<i>Seven</i>	7	Toddoba
<i>Eight</i>	8	Siddeed
<i>Nine</i>	9	Sagaal
<i>Ten</i>	10	Toban
<i>Eleven</i>	11	Kow yo toban
<i>Twelve</i>	12	Labo iyo toban
<i>Thirteen</i>	13	Saddex iyo toban
<i>Fourteen</i>	14	Afar iyo toban
<i>Fifteen</i>	15	Shan iyo toban
<i>Sixteen</i>	16	Lix iyo toban
<i>Seventeen</i>	17	Toddoba iyo toban
<i>Eighteen</i>	18	Siddeed iyo toban

Nineteen	19	Sagaal iyo toban
Twenty	20	Labaatan
Twenty one	21	Kow iyo labaatan
Twenty two	22	Laba iyo labaantan.
Thirty	30	Soddon
Thirty one	31	Kow iyo soddonn
Fourty	40	Afartan
Fifty	50	Konton
Sixty	60	Lixdan
Seventy	70	Toddobaatan
Eighty	80	Siddeetan
Ninety	90	Sagaashan
Hundred	100	Boqol
Hundred one	101	Boqol iyo kow
A thousand	1000	Kun
Two thousand	2000	Laba kun
Ten thousand	10000	Toban kun
One million	1000000	Hal malyan

*In Somali, nouns preceded by a number are always in the singular form. e. g. (Afar nin; Toban nin; etc)*

## PEOPLE & OCCUPATIONS DADKA & SHAQOYINKA

<i>Where is Jama ?</i>	Jaamac aaway ?
<i>He went to the office</i>	Wuxuu aaday xafiiska
<i>He is an engineer.</i>	Isagu waa muhandis.
<i>Those two men are teachers.</i>	Labadaas nin waa macallimiin.
<i>These girls are students.</i>	Gabdhahani waa arday.
<i>Is Jama a farmer ?</i>	Jaamac ma beeraley baa ?
<i>No, he is not.</i>	Maya, ma aha.
<i>He is an artist.</i>	Waa fannaan.
<i>Ali is a lawyer</i>	Cali waa qareen.
<i>He works at the courts.</i>	Wuxuu ka shaqeeyaa maxkamadaha.
<i>Yusuf is a soldier.</i>	Yuusuf waa askari.
<i>His brother is a pilot.</i>	Walaalkii waa duuliye
<i>Their sister is a writer</i>	Walaashood waa qoraa.
<i>Their father is an actor.</i>	Aabbahood waa jile.
<i>Who is an actor ?</i>	Kumaa jile ah ?
<i>My friend is.</i>	Saaxiibkay baa ah.
<i>Do you know him ?</i>	Ma taqaan ?

Who ?

That little boy's father.

Yes, he is a merchant.

He is not a doctor as you thought.

I did not think that.

Who is that ?

She is Ali's sister.

What is she ?

She is a Director.

She is a Shopkeeper

Kuma ?

Wiilkaas yar aabbihi

Haa, waa ganacsade.

Takhtar ma aha sidaad  
mooday. moodda)

Sidaas ma moodin.

Taasi waa tuma ?

Waa Cali walaashiis.

Maxay tahay ?

Waa agaasimad.

Waa dukaanley.

## A CONVERSATION

Ali : When do you get up ?

Abdi : Usully at six O'clock.

Ali : When do you take a bath ?

Abdi : At ten past six.

Ali : Who wakes you up ?

Abdi : My mother does.

Ali : When do you usully eat breakfast ?

Abdi : At six thirty.

Ali : What do you do after breakfast ?

Abdi : I go to work.

Ali : Do you go to the movies ?

Abdi : Sometimes I do.

Ali : Do you read newspapers ?

Abdi : Not many.

Ali : When shall we meet next ?

## SHEEKAYSI

Cali : Goormaad toostaa ?

Cabdi : Inta badan lixda.

Cali : Goormaad qubey-  
astaa ?

Cabdi : Lixda iyo barka.

Cali : Yaa ku toosiya ?

Cabdi : Hooyadey.

Cali : Goormaad badanaa  
quraacataa ?

Cabdi : Lixda iyo barka.

Cali : Maxaad sameysaa qura-  
acda ka dib ?

Cabdi : Waan shaqo tagaa.

Cali : Filinka ma aaddaa ?

Cabdi : Marmar baan tagaa.

Cali : Joornaalka ma akhr-  
idaa ?

Cabdi : Wax yar (Ma badna).

Cali : Goormaynu is-arkay-  
naa ?

Abdi : Tomorrow morning.

Ali : Where ?

Abdi : In here. Just at this Bar.

Ali : What time is it now ?

Abdi : I don't know. I never had one.

Ali : Is it true that you don't know about watches ?

Abdi : I'm not joking. It's true.

Ali : All right. I shall teach you tomorrow about watches.

Abdi : I like to know about them.

Cabdi : Berri Subax.

Cali : Xaggee ?

Cabdi : Halkan. Baarkan naftisa.

Cali : Hadda saacaddu waa immisadii ?

Cabdi : Ma aqaan. Weligeey mid ma yeelan.

Cali : Ma kaa run baa saacadaha wax kama aqaan ? *berri ma topaan*

Cabdi : Ma kugu dheelayo. Waa iga dhab.

Cali : Waa hagaag. Berri baan saacadaha wax kaa barayaa.

Cabdi : Waan jeclahay inaan wax ka barto.

## TELLING THE TIME

What time is it ?

It is five O'clock.

It is ten minutes to ten.

It is ten past five.

It is five five.

It is eleven thirty.

It is twenty minutes to ten.

It is six O'clock.

It is late.

It is early.

When do you go to bed ?

I go to bed early.

Did you come yesterday night ?

No, I came last night.

There is a good movie tonight.

## SHEEGISTA WAQTIGA

Waa immisadii ?

Waa shantii.

Waa tobankii oo toban diiman.

Waa tobankii iyo shan daqiiqo.

Waa shantii iyo shan.

Waa kow iyo tobankii iyo bar.

Waa tobankii oo labaatan dhimman.

Waa lix saac (lixdii).

Waa goor dambe.

Waa goor hore.

Goormaad seexataa ?

Goor hore seexdaa.

Habeen hore ma timid ?

Maya, xalay baan imid.

Caawa filin fiican baa jira.



*I shall go in late.*

*Tomorrow is a holiday.*

*Do you plan to go to the beach tomorrow?*

*Yes, I hope to go there early.*

*What time do you think?*

*At about seven sharp in the morning.*

*Who is coming with you?*

*Nobody I know of.*

*Why don't you pass me by?*

*Would you be ready at quarter to seven?*

*I don't think, because I had an earlier appointment with the doctor.*

*Well, I am sorry I can't expect you.*

*O.K. I'll see you at midday at home.*

*Good bye.*

Goor dambaan geli doonaa.

Berri waa fasax (feesto).

Berri badda ma aadaysaa?

Haa, waxaan rajeynayaa inaan goor hore tago.

Goormay kula tahay?

Subaxdii toddobada oo gaw ah.

Yaa ku soo raacaya?

Cidna.

Maad i soo martid?

Toddobada oo rubac la' diyaar ma noqonaysaa?

Fili maayo. maxaa yeelay ballan horaan takhtarka la lahaa.

Waan ka xumahay haddaa, kuma sugi karo.

Waa hagaag. Gurigeynna isku arki duhurkii.

Nabad gelyo.

## CLOSED and OPEN

*The door is open.*

*The door is not closed.*

*Is the door closed?*

*No, it is not. It is open.*

*The window is closed.*

*The window is not open.*

*Is the window open?*

*No, it is not. It is closed.*

*Are the doors and the windows closed?*

*No, the doors are open but the windows are closed.*

*How many closed books are there on the table?*

*I don't know. I have not counted them.*

*Are there any open books on the table?*

## XIRAN iyo FURAN

Albaabku waa furan yahay.

Albaabku ma xirna.

Albaabku ma xiran yahay?

Maya, ma xirna. Waa furan yahay.

Dariishaddu way xiran tahay.

Dariishaddu ma furna.

Dariishaddu ma furan tahay?

Maya, ma furna. Way xiran tahay.

Albaabbada iyo dariishaduhu ma xiran yihiin?

Maya, albaabbadu way furan yihiin laakiin dariishaduhu way xiran yihiin.

Meeqa buug oo xiran baa miiska saaran?

Ma aqaan. Ma aanan tirin.

Wax buugag ah oo furani miiska ma saaran yihiin?

No, there are no open books there.

Yes, there is only one open book.

Yes, they are all open.

There is none closed.

Why don't you close the house when you left it?

Did I not close it?

I thought I have done.

No, it was open when I came in.

I am sorry, I wasn't careful.

Do be careful now and then.

Thank you for your advice.

Maya, buugag furani ma jiraan.

Haa, hal buug oo furan baa jira.

Haa, dhammaan way furan yihiin.

Midna ma xirna.

Maxaad guriga u soo xiri weydey markaad ka tagtay?

Miyaanan soo xirin?

Waxaan moodayey inaan xiray.

Maya, waa furnaa markaan imid.

Waan ka xumahay, kamaan feejignaan. <sup>o ma</sup> feejignaan?

Hadda iyo hadhowba ka feejignow.

Taladaas waad ku mahadsan tahay.

## COLOURS

### Black

The Blackboard is black.

### White

She wore a white dress

### Red

Is your shirt red in colour?

### Green

Vegetables are always green.

### Blue

The Somali Flag is blue.

### Yellow

The yellow books are expensive.

### The sky

The sky is clear with no clouds.

### A coat

## MIDABYADA

### Madow

Sabuuraddu way madowdahay.

### Cad

Dhar cad bay xirnayd.

### Guduud (casaan)

Shaatigaaga midabkiisu ma guduud baa?

### Cagaar

Khudraddu weligeed waa cagaar.

### Buluug

Calanka Soomaalidu waa buluug.

### Huruud

Buugagga huruudda ahi waa qaali

### Cirka

Cirku waa saafi aan daruur lahayn.

### Jubbad

She is wearing a blue coat.

What colour is your coat?

It is black.

Which colour do you like best?

I like the green ones.

I don't, because it <sup>subito</sup> easily gets dirty.

I agree with you but it is beautiful.

Ti amao Taonato  
Halima ee iste fano

Waxay xiran tahay jubbad buluug ah.

Jubbaddaadu waa midabkee? Waa madow.

Midabkee ugu jeceshahay?

Waxaan jeclahay kuwa caga-aran.

Lebbis (dhar) cad miyaadan jeclayn?

Ma jecli, maxaa yeelay marki-iba wuu wasakhoobi og yahay.

Waan kugu raacsanahay laakiin waa qurux miiran.

## WORKING

I am working

We are working

We are working in the house

Do you work on Fridays?

No. I don't. My father does.

He works on his farm.

Mother works at home.

My sister helps my mother.

She works hard.

My brother works in an Hotel.

We are farmers.

The working hours are to be observed.

Working conditions are not bad.

## SHAQAYN

Waan shaqaynayaa

Waannu shaqaynaynaa.

Gurigaannu ka shaqaynaynaa.

Jimcayaasha ma shaqaysaa?

Maya, ma shaqeeyo. Aab-bahay baa shaqeeya.

Beertiisuu ka shaqeeyaa.

Hooyo waxay ka shaqaysaa guriga.

Walaashay baa hooyaday kaalmaysa.

Aad bay u shaqaysaa.

Walaalkay wuxuu ka shaqeeyaa Hoteel.

Annagu waxaannu nahay be-eraley.

Iyagu waa shaqaale.

Saacadaha shaqada waa in la dhawraa.

Xaaladaha shaqadu ma xuma.

*They don't work on Sundays.*

*Today is a holiday.*

*Do you work on holidays?*

*No, we don't.*

*We stay at home.*

*Do you like the work?*

*Yes, I do.*

*How long do you work?*

*I work many hours.*

*Where do you work?*

*I work at the docks.*

*Have you ever been on a ship?*

*So many times.*

Axadaha ma shaqeeyaan.

Maanta waa fasax.

Fasaxyada ma shaqaysaan?

Maya, ma shaqaynno.

Gurigaannu iska joognaa.

Shaqada ma jeceshahay?

Haa, waan jeclahay.

Intee baad shaqaysaa?

Saacado badan baan shaqeeyaa.

Xaggee baad ka shaqaysaa?

Dekedahaan ka shaqeeyaa.

Weiigaa markab ma kortay?

Wax badan.

## TELEPHONE CONVERSATION

*Abdi: Hello, is Jama there?*

*Jama: This is Jama.  
Good morning.*

*Abdi: How are you Jama?  
This is Abdi.*

*Jama: Fine, thanks. How are you?  
What is new?*

*Abdi: I am going on a trip today.*

*Jama: Really! Where to?*

*Abdi: To somewhere in Yurub.*

*Jama: For what reason?*

*Abdi: For Scholarship.*

*Jama: That is fine. When're you leaving.*

*Abdi: Tomorrow morning.*

## SHEEKAYSI TALEEFAN

*Cabdi: Halow, Jaamac ma joogaa?*

*Jaamac: Waa Jaamac. Subax wanaagsan.*

*Cabdi: War Jaamac bal iska warran? Waa Cabdiye.*

*Jaamac: Waan roonahay, mahadsanid, Adigu iska warran. Maxaa cusub?*

*Cabdi: Safar baan maanta u baxayaa.*

*Jaamac: Ma kaa dhab baa Xaggee?*

*Cabdi: Meel Yurub ka mid ah.*

*Jaamac: Sababtee u baxaysaa?*

*Cabdi: Xeraysi dibadeed.*

*Jaamac: Way wanaagsan tahay. Goormaad tegeysaa?*

*Cabdi: Berri subax.*



Jama : So soon ? How are you going ?

Abdi : Naturally by plane.

Jama : When are you coming back ?

Abdi : After four years.

Jama : Too long! Can we meet tonight ?

Abdi : I am afraid not. I am busy buying things.

Jama : Well, I hope you good time.

Abdi : Thank you Jama. I hope you will write to me.

Jama : After I get your address.

Abdi : That is natural. I'll write to you as soon as I get there.

Jama : I hope so, Good bye.

Abdi : Good bye, Jama.

Jaamac : Ma dhaqsahaas ?  
Maxaad raacaysaa ?

Cabdi : Dabcan dayuurad.

Jaamac : Goormaad soo laab anaysaa ?

Cabdi : Afar sono ka dib.

Jaamac : Aad bay u dheer tahay! Caawa mays arki karnaa ?

Cabdi : Waxaan ka baqayaa inaysan suuroobeyn. Wax gadasho ayaan mashquul ku ahay.

Jaamac : Waa hagaag. Waqti fiican baan kuu rajeynayaa.

Cabdi : Mahadsanid Jaamac. Waxaan rajeynayaa inaad xaashiyo ii soo qori doonto.

Jaamac : Ka dib kolkaan cun-waanka helo.

Cabdi : Taasi waa iska dabiici. Markaan istaago ayaan xaashi kuu soo dirayaa.

Jaamac : Waan kaa filayaa. Nabadgelyo.

Cabdi : Nabadgelyo Jaamac

## SHOPPING

Do you have sugar, Ali ?

We need some sugar.

How much is a pound of sugar ?

It is cheap.

It is two shillings a pound.

Do you need milk, too ?

No, thank you.

We don't drink milk, at night.

I need rice and eggs.

Where could I get them ?

In the market.

Don't you need bananas ?

No, I don't need them.

I have some at home.

What about meat ?

## WAX GADASHO

Sonkor ma haysaa, Cali ?

Qaddar sonkor ah baannu u baahan nahay.

Rodolka sonkorta ahi waa immisa ?

Waa jaban yahay (waa raqiis).

Rodolkii waa laba shilin.

Caanana ma u baahan tahay ?

Maya, mahadsanid.

Habeenkii caanaha ma cabno.

Bariis iyo ukun baan u baahanahay.

Xaggee baan ka heli karaa ?

Suuqa.

Moos miyaadan u baahnayn ?

Maya, uma baahni.

In baa guriga ii taal.

Hilib ka warran ?



*I need it, but I ran short of money.*

*Meat is expensive these days.*

*How much is a pound of meat?*

*It is three shillings a pound.*

*This store is clean. Isn't it?*

*It's my uncle's.*

*There is everything in it.*

*But it is crowded.*

*How many eggs do you need?*

*I need ten. How much is each?*

*It is fifty cents.*

*It is not cheap.*

*It is usually like that.*

Waan u baahanahay laakiin lacagtii baa iga dhammaatay.

Maalmahaan hilibku waa qaali.

Rodolka hilibka ahi waa immisa?

Rodolkii waa saddex shilin.

Dukaankaani waa nadiif.  
Saw maaha?

Adeerkay baa leh.

Wax kastaa way yaalliin.

Laakiin wuu dad badan yahay.

Immisa ukun ah baad u baahan tahay?

Toban baan u baahanahay.  
Middii waa immisa?

Waa konton senti.

Ma jabna (raqiis ma aha).

Badanaa waa sidaas.

## TELLING THE DATE

### DAYS OF THE WEEK

*Sunday*

*Monday*

*Tuesday*

*Wednesday*

*Thursday*

*Friday*

*Saturday*

### MONTHS OF THE YEAR

*January*

*February*

*March*

*April*

*May*

*June*

*July*

*August*

## TAARIIKH - SHEEGISTA

### MAALMAHA TODDOBA-ADKA

Axad

Isniin

Talaada

Arbaca

Khamiis

Jimce

Sabti

### BILAHA SANNADKA

Jannaayo

Febraayo

Maarso

Abriil

Maajo

Juun

Luulyo

Agoosto

September

October

November

December

Sitambar

Oktoobar

Noofembar

Disembar

*How many days are there in a week?*

Toddobaadkii waa immisa maalmood?

*There are seven days in a week.*

Toddobaadkii waa toddoba maalmood.

*How many weeks are there in a month?*

Bishii waa immisa toddobaad?

*There are four weeks in a month.*

Bishu waa afar toddobaad.

*How many months are there in a year?*

Sannadkii waa immisa bilood?

*There are twelve months in a year.*

Sannadkii waa laba iyo toban bilood.

*What is today?*

Maanta waa ayaanma?

*It is Monday.*

Waa Isniin.

*What is tomorrow?*

Berri maxay tahay?

*It is Tuesday.*

Waa Talaada.

*What month is it?*

Bishani waa tuma?

*It is March.*

*What year is this?*

*It is nineteen seventy-three.*

*Today is Friday.*

*Tomorrow is Saturday.*

*Next month is April.*

*What is the date today?*

*It is October 21st, 1974.*

*Tell me the date.*

*I can't tell the date.*

*It is Friday August 5th, 1975.*

*It is a prospective year.*

*Today, the weather is fine.*

*They came here last week.*

*She is planning to depart next month.*

*I visited Cairo last year.*

Waa Maarso.

Waa Sannadkee?

Waa kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toddobaatan.

Maanta waa Jimce.

Berri waa Sabti.

Bisha soo socota waa April.

Maanta taariikhdu waa maxay?

Waa 21kii Oktoobar, 1974.

Taariikhda ii sheeg.

Taariikhda ma sheegi karo.

Waa Jimce bishii Agoosto 5dii 1975.

Waa sannad barwaaqo.

Maanta hawadu way fiican tahay.

Toddobaadkii horay halkan yimaadeen.

Waxay dooneysaa inay bisha dambe tagto.

Qaahira waxaan tegey sannadkii hore.

*What is your name ?*  
*Whose house is this ?*  
*It is my mother's.*  
*Who is Ahmed ?*  
*He is that little boy.*  
*Who is there ?*  
*Where does he live ?*  
*He lives in Nigeria.*  
*How old is he ?*  
*He is eighteen years old.*  
*Is he a doctor ?*  
*No, he is not.*  
*He is a school boy.*  
*What is he doing now ?*  
*He is tailing a shirt.*  
*He sometimes does this work.*  
*Do you sing ?*

Magacaa ?  
 Gurigaan yaa leh ?  
 Hooyadey baa leh.  
 Axmed waa kee ?  
 Waa wiilkaas yar.  
 Yaa halkaas jooga ?  
 Xaggee buu ku nool yahay ?  
 Wuxuu ku nool yahay  
 Nigeria.  
 Waa immisa jir ?  
 Waa siddeed iyo toban jir.  
 Ma takhtar baa ?  
 Maya, ma aha.  
 Waa dugsiiley.  
 Muxuu hadda samaynayaa ?  
 Shaati buu tolayaa.  
 Marmar buu shaqadaas  
 qabtaa.  
 Ma heestaa ?

*No, I don't.*

*My sister does.*

*Where are you going to ?*

*I am going to the movie.*

*What is on ?*

*A good movie.*

*I don't like going to movies.*

*I like reading.*

*Do you read much ?*

*Yes, I do.*

*What is that book you have ?*

*It is about astronomy.*

Maya, ma heeso.

Walaashay baa heesta.

Xaggee baad ku socotaa ?

Waxaan ku socdaa Filinka.

Maxaa socda ?

Filin fiican.

Ma jecli Filinka aadistiisa.

Waxaan jeclahay akhriska.

Ma aad baad wax u  
akhrisaa ?

Haa, aad baad wax u akhri-  
yaa.

Waa maxay buuggaas aad  
haysataa ?

Waa xiddigis.

ABOUT THE WEATHER

H A W A D A

Rain

Roob

A heavy rain

Roob badan.

It is raining heavily.

Aaad buu u da'ayaa.

I can't go outside for it is raining.

Bannaanka uma bixi karo maxaa yeelay roob baa da'aya.

How is the weather today?

Hawadu maanta sidec bay tahay?

It is a bad weather.

Waa hawo xun.

It is a good weather.

Waa hawo fiican.

It is a dusty weather.

Waa hawo siigo miiran ah.

It is a hot weather.

Waa hawo kulul.

Has it stopped raining?

Roobkii ma kacay? (ma qaaday?).

No, it is still raining.

Maya, weli waa da'ayaa.

Summer; Summer rains.

Xagaa; Xagaayo.

I hate Summer rains.

Waan necbahay xagaayda.

It is always hot in Summer.

Had iyo jeer xagaagii waa kulayl.

Winter

Jiilaal

*Draught comes in Winter.*

Abaartu Jiilaalkii bay timaaddaa.

Autumn.

Dayr

*I always take my leave in Autumn.*

Had iyo jeer waxaan fasax qaataa Dayrta.

Spring

Gu'

*Everywhere gets green in the spring.*

Gu'gii meel waliba way cagaarantaa.

Seasons

Xilliyo.

*There are four seasons in a year.*

Sannadkii waa afar xilli.

The sun

Qorraxda

*The sun is up.*

Qorraxdii way soo baxday.

*The sun has set.*

Qorraxdii way dhacday.

*It is a lively day!*

Waa maalin wanaagsan!

*It is neither hot nor cold.*

Ma kulula mana qabooba.

*The sea is calm.*

Baddu way deggan tahay.

*The sea is rough.*

Baddu way kacsan tahay.

*People don't like rough seas.*

Dadku ma jecla badaha kacsan.

*Greetings & Compliments*

*Good morning.*

*Good evening.*

*Good afternoon.*

*Good night.*

*Goodbye.*

*How do you do ?*

*How is your father ?*

*He is fine. And yours ?*

*He is fine, too.*

*Are you well ?*

*How do you feel ?*

*Very well, thank you.*

*How is your family ?*

*They are all fine.*

*How is your wife ?*

S A L A A N T A

Subax wanaagsan.

Galab wanaagsan.

Galab wanaagsan.

Habeen wanaagsan.

Nabadgelyo.

Sidee tahay ? (Iska warran ?).

Aabbahaa sidee yahay ?

Waa ladan yaha; Aabbahana ?

Isna waa ladan yahay.

Ma roon tahay ? (ma ladan tahay ?)

Sidee tahay ?

Aad baan u ladanahay, mahadsanid.

Xaaskaagii sidee yahay ? (ka warran ?)

Giddigood way ladan yihiin.

Afadaadii see tahay ?

*She is not well.*

*How is your husband ?*

*I haven't seen him for long.*

*He is away.*

*Remember me to your father.*

*Convey my greetings to them.*

*I longed to see you.*

*Are you all well at home ?*

*Do sit down.*

*Take a seat.*

*I can't, I'm in a great hurry.*

*You don't want to have anything with me ?*

*I'm sorry, I have told you.*

Ma ladna. (way xanuunsanay-saa).

Saygaagii (ninkaagii) sidee yahay ?

Beryahaan ma arag.

Waa maqan yahay.

Aabbahaa igu salaam.

(Iyaga) igu salaam.

Waan u jeelay aragtidaada.

Gurigii ma lagu wada nabad qabey ?

Fariiso, soo dhowow.

Fariiso. (Kursi soo qaado).

Ma karo, aad baan u degdeg-sanahay.

Waxba ila cabbi meysid miyaa ?

Waan ka xumahay, waan kuu sheegay.



ABOUT THE AGE

*How old are you ?*

*I am fourty.*

*How old is he ?*

*He will be 20 next year.*

*How old is she ?*

*She is ninteen years of age.*

*Are you 30 years old ?*

*No, I am older than that.*

*Ali is nearly ten.*

*He will be eleven next month.*

*He was nine years last month.*

*He looks older.*

*She is still quite young.*

*She is older than me.*

*He is the elder of the children.*

D A ' D A

*Immisa jir baad tahay ?*

*Afartan jir baan ahay.*

*Isagu waa immisa jir ?*

*Sannadka dambe ayuu 20 jirsanayaa.*

*Iyadu waa immisa jir ?*

*Waa sagaal iyo toban jir.*

*Soddon jir ma tahay ?*

*Maya, intaas ka weyni.*

*Cali waa toban ku dhowaad.*

*Bisha dambe ayuu kow iyo toban jirsanayaa.*

*Bishii hore sagaal jir buu ahaa.*

*Waa igala weyn yahay.*

*Weli aad bay u yar tahay.*

*Iyadu iga weyn.*

*Isagaa carruurta u weyn.*

*This is my elder son.*

*He is more than fifty.*

*She doesn't look her age.*

*My mother has turned sixty.*

*You don't look so old.*

*I was thirty last month.*

*He is either nine or ten.*

*Yusuf is older than Ali.*

*He is four years older than him.*

*I'm two years older than my wife.*

*He is an old man now.*

*He is too young to be a pilot.*

*Kani waa curadkaygii.*

*Konton jir ka weyn.*

*Da'deedu kama muuqato.*

*Hooyaday lixdan dhaaftay.*

*Da'daadu kaama muuqato.*

*Bishii horaan soddon jirsaday.*

*Waa sagaal jir ama waa toban jir.*

*Yuusuf baa Cali ka weyn.*

*Afar sano buu ka weyn yahay.*

*Laba sano baan afadayda ka weynahay.*

*Hadda waa nin weyn*

*Aad buu ugu yar yahay inuu duulive noqdo.*

NB

IN A BAR

Let us go to the Bar.

Let us go. I am thirsty and want something to drink.

Will you take Coca-cola?

No, I will take black coffee.

Do you take sugar in your coffee?

What will you take?

I will take some tea.

How much is a cup of tea?

Thirty cents only.

Give me one cup of coffee.

Do you take milk in your tea?

No, I don't. I want it black.

Inakeen baarka aadnee.

Ina mari, waaban oommana- hay oo waxaan cabbaan raba-  
aye.

Koka kola ma cabbaysaa?

Maya, bun madow baan cab-  
bayaa.

Bunka sonkor ma ku darsa-  
taa?

Maxaad cabbaysaa?

Shaah baan cabbayaa.

Koobka shaah ahi immisuu  
joogaa?

Soddon senti keliya.

Koob bun ah i sii.

Caano ma ku darsataa  
shaaha?

Maya, waxaan rabaa rinji.  
(bigays).

I would like something cold.

Do you take iced tea?

Sometimes.

They take it in Amercia.

How much do I pay?

Let me pay it.

You will pay some other time.

I must pay for myself.

Cold water is not charged.

He would like a glass of cold  
water.

I don't usully drink hot tea.

I am exactly like you.

Will you have lunch with me  
tonight?

That pleases me.

Wax qabow baan (jeclaan)  
lahaa.

Shaah baraf leh ma cabtaa?

Marmar.

Maraykan bay ku cabbaan.

immisaan bixiyaa?

Anigu aan bixiyee daa.

Mar kale baad bixin doontaa.

Waa inaan iska bixiyaa.

Biyaha qaboobi lacag ma leh.

Wuxuu jeclaan lahaa galaas  
biyo qabow ah.

Badanaa shaaha kulul ma  
cabbo.

Aniguna kula mid baan ahay.

Caawa ma ila cashaynaysaa?

Waan jeclahay.

*Do you have any Somali books?*

*Do you sell magazines? Yes, I do.*

*What books have you?*

*We have novels.*

*We have text books.*

*We sell English books.*

*Show me that red book.*

*Do you like science books?*

*No, I am interested in historical works.*

*Show me some of those post-cards.*

*Do you have an English Dictionary?*

Buug Soomaali ah ma haysaa?

Joornaallo ma gaddaa?  
Haa, waa gadaa.

Maxay yihiin buugtaad haysaa?

Waxaan haynaa buugta sheekooyinka.

Waxaan haynaa buugta dugsiyada.

Waxaan haynaa buugag Ingiriis ah.

Buuggaas guduudan i tus.

Buugta sayniska ma jeceshahay?

Maya, waxaan doonayaa buugta taariikhda ah.

Xaashiyahaas boostada qaar i tus.

Abwaan Ingiriis ah ma haysaa?

*Yes, we have many.*

*Do you have any books on the history of Somalia?*

*Yes, we have several books.*

*What is the name of the author?*

*How much is it?*

*It is rather expensive.*

*Show me those maps over there.*

*Do you have a map of Africa?*

*This is not a good quality.*

*It is the best.*

*You sell ink, don't you?*

*Yes, I do.*

*What kind of ink do you want?*

*Do you sell envelopes?*

*Oh, yes, I have all sorts of them.*

*How do you sell them?*

Haa wax badan baannu haynaa.

Ma haysaa wax buug ah oo ku saabsan taariikhda Soomaaliya?

Haa, dhawr baannu haynaa.

Qoraaga magaciis?

Immisuu joogaa?

Waa yara qaali.

Maababkaas i tus.

Maabka Afrika ma haysaa?

Kani nooc wanaagsan ma aha.

Waa nooca u wanaagsan. (waa ka ugu wanaagsan).

Khad waad gaddaa, saw maaha?

Haa, waan gadaa.

Khadka nooc ee rabtaa?

Boqshado ma iibisaa?

Haa, nooc kasta waan hayaa.

Sidee u gaddaa?

LEARN THESE PHRASES HADALLADAAN BARO

*Listen to me.*

*What do you want ?*

*I have something to tell you.*

*What is your father's name ?*

*Does he know you ?*

*Do you understand me ?*

*I don't understand you.*

*Why do you not answer ?*

*What do you mean ?*

*How long have you been here ?*

*One year only .*

*Which one do you like best ?*

*I am listening to you.*

*What do you say ?*

*What is that ?*

I maqal

Maxaad rabtaa ?

Waxaan raabaa inaan wax kuu sheego.

Aabbahaa magaciis ?

Ma ku yaqaan ?

Waxaan leeyahay ma garanaysaa ? (May garatay ?)

Waxaad leedahay ma garan. (Kuma garan).

Maxaad u jawaabi weydey ?

Maxaad u jeeddaa ?

Immisaad halkaan joogtey ?

Hal sano keliya.

Kee baad ugu jeceshahay ?

Waan ku dhegeysanayaa (maqlayaa).

Maxaad leedahaay ?

Kaasi (waxaasi) waa maxay ?

*What is the use of it ?*

*Do you speak Somali ?*

*Yes, I speak it fluently.*

*How did you come here ?*

*Did he come today ?*

*I came on foot.*

*When will he come back ?*

*When did you come ?*

*When will you leave ?*

*Tomorrow or the day after.*

*Where did he go ?*

*Where did you come from ?*

*Could you give me your book ?*

*I am sorry to trouble you.*

*I said nothing.*

*Do you know my wife ?*

Maxaa laga helayaa ? (Maxaa ka faaido ah ?).

Af Soomaali ma ku hadashaa ?

Haa, si fiican baan ugu hadlaa.

Sidaad halkaan ku timid ?

Ma maantuu yimid ?

Lug baan ku imid.

Goormuu soo laabanayaa ? (noqonayaa).

Goormaad timid ?

Goormaad tegeysaa ?

Berri ama saaddambe.

Xaggee buu aadey ?

Xaggee baad ka timid ?

Buuggaaga ma i siin karaysaa ?

Waan ka xumahay inaan ku labo (rabsho).

Wexba ma oran.

Afadayda ma taqaan ?



No, I don't know her.

What are you looking for?

Did you see my father?

He was here an hour ago.

I know him well.

I am sure of it.

Its certain.

No, you are wrong.

You are mistaken.

It does not concern me.

Wait for me.

Excuse me.

Not at all,

Never mind.

Make haste.

Do you believe that?

What is to be done?

What have you done?

Maya, ma aqaan.

Maxaad eeg eegeysaa? (raad-ineysaa).

Aabbahay ma aragtay?

Halkan buu joogey hal saac ka hor.

Haa, si fiican baan u aqaan.

Waa hubaa.

Waa hubaal.

Maya, waad qaldan tahay.

Waad gefsan tahay.

Waxba iigama jiraan. (Aniga ima danayso)

I sug.

Iga raalli ahaw.

Waxba ma aha.

Ha xaalayn.

Dhaqso.

Sidaas ma qabtaa?

Maxaa la sameeyaa?

Maxaad samaysay?

I have done nothing.

That is too much.

That is enough for me.

I don't want any more.

He won't give you that much.

Forgive me.

I was joking.

They won't accept us.

I shall make them do it.

He is in a hurry.

Eat slowly.

Fill the stomach.

Have a mouthful of cake.

Waxba maan samayn.

Intaasi waa badan tahay.

Intaasi igu filan. 0-11

Intaas wax ka badan ma rabo.

Wax intaas dhan ku siin maayo.

I saamax.

Waan kaftamaayey (cayaarayey).

Ina yeeli maayaan.

Anaa yeelsiin doona.

Wuu degdegsan yahay.

Qun yar wax cun.

Caloosha buuxi.

Kecgga cantuug.



**MORE PHRASES AND SENTENCES**

*Put on.*

*Put on your shirt.*

*Put on your hat.*

*Don't put your shirt on.*

*He put on his clothes in a hurry.*

*Put that one on.*

*Put down.*

*Put down your name.*

*He is putting down his address.*

*Put off.*

*The teacher put off the meeting.*

*He also put off the lecture.*

*Put out.*

*Put out the light.*

*We put out the fire.*

*Take off.*

**HADALLO IYO WEERO KALE**

Gasho.

Shaaatigaaga gasho.

Koofidaada gasho.

Shaatigaaga ha gashan.

Degdeg buu dharkiisii u gashaday.

Kaas gasho.

Qor (dhig).

Magacaaga qor.

Wuxuu qorayaa cunwaankiisa (meesha laga helo).

Baajin.

Macallinku shirkii wuu baajiyey.

Lagjarkiina wuu baajiyey.

Dami (baqtii).

Nalka dami.

Dabkii baannu daminnay.

Bixi.

*Take your tie off.*

*Why did he take his hat off?*

*People take their clothes off before they go to bed.*

*Don't take your coat off, because it is cold.*

*I took my new shoes off.*

*Get him a shirt.*

*I got your note.*

*She got away from this town.*

*Get away with.*

*He got away with the girl, too.*

*She got in the bus.*

*They got off the taxi.*

*Get over.*

*I hope you get over it.*

*Get through.*

*Get up.*

*Workers get up early.*

*Nigtayga iska bixi.*

*Muxuu koofiyadda iskaga bixiyey?*

*Dadku dharkay iska bixiyaan intayan seexan.*

*Jubbadda hayska bixin waa dhaxane.*

*Kabihii cusbaa baan iska bixiyey.*

*Shaati u keen.*

*Farriintaadii waan helay.*

*Beldkaan way ka tagtay.*

*La carar.*

*Gabadhiina wuu la cararay.*

*Baskii bay gashay.*

*Tagsigii bay ka degeen.*

*Bagso.*

*Waxaan rajeynayaa inaad ka bogsato.*

*Idlayn.*

*Toosid.*

*Shaqaaluhu goor hore bay kacaan.*

<i>Get together.</i>	Kulan.
<i>Let us get together on Friday.</i>	Jimcaha aan kulanno.
<i>Give him some money.</i>	In lacag ah sii.
<i>Give up.</i>	Iska deyn.
<i>I gave up smoking.</i>	Sigaarkii waan iska daayey.
<i>Give in.</i>	Isdhiib.
<i>Enemy.</i>	Cadow.
<i>Troops.</i>	Ciidammo.
<i>The enemy troops gave in.</i>	Ciidammadii cadowgu way is-dhiibeen.
<i>Give rise to.</i>	Keenid (sababid).
<i>Oppression.</i>	Dulmi (cadaadin)
<i>Revolutions.</i>	Tawrado (kacaanno).
<i>Oppression gives rise to revolutions.</i>	Tawradaha waxa keena dulgiga.
<i>Look at.</i>	Fiirin.
<i>Look at that lion.</i>	Libaaxa fiiri.
<i>Take a look at this watch.</i>	Saacaddan fiiri.
<i>Look after.</i>	Ilaalin.
<i>Mothers look after their children.</i>	Hooyoyinku ilmahooda ayay ilaaliyaan.

<i>Look for</i>	Raadin
<i>Lost</i>	Lumay
<i>I am looknig for my lost pen.</i>	Waxaan raadinayaa qalinkay-gii lumay.
<i>Look forward to.</i>	Sugid.
<i>Arrival.</i>	Imaatin.
<i>She looks forward to his arrival.</i>	Waxay aad u sugaysaa ima-atinkiisa.
<i>Look up.</i>	Ka raadin.
<i>Look up that word in the Dictionary.</i>	Eraygaas abwaanka ka fiiri (raadi).

QUESTIONS AND SHORT  
ANSWERS

SU'AALO IYO JAWAABO  
GAAGAABAN

*Are they coming ?*

*Yes, they are.*

*No, they are not.*

*Am I late ?*

*Yes, you are.*

*No, you are not.*

*Was he angry ?*

*Yes, he was.*

*No, he wasn't.*

*Did he get my letter ?*

*Yes, he did.*

*No, he didn't.*

*Did it rain yesterday ?*

*Yes, it did.*

*No, it did not.*

*Do we have time ?*

*Yes, we do.*

*No, we don't.*

Ma imanayaan ?

Haa, way imanayaan.

Maya, iman maayaan.

Miyaan daahay ?

Haa, waad daahday.

Maya, ma daahin.

Miyuu caraysanaa ?

Haa, wuu caraysanaa ?

Maya, ma caraysanayn.

Xaashidaydii ma helay ?

Haa, wuu helay.

Maya, ma helin.

Shalay roob ma da'ay ?

Haa, waa da'ay.

Maya, ma di'in.

Waqti ma haysannaa ?

Haa, waan haysanaa.

Maya, ma haysanno.

*Have you been sitting for long ?*

*Yes, I have been.*

*No, I haven't been.*

*Does he live here ?*

*Yes, he does.*

*Didn't you see him ?*

*Yes, I did.*

*No, I didn't.*

*Can you give me some money?*

*I'm sorry, I can't.*

*Yes, I can.*

Ma in badan baad fadhiday ?

Haa, in badan baan fadhiyey.

Maya, ma fadhiyin.

Ma halkaan buu ku nool yahay ?

Haa, halkaan buu ku nool yahay.

Miyaadan arag ?

Haa, waan arkay.

Maya, ma arag.

In lacag ah ma i siin karaysaa ?



Waan ka xumahay, ma kari karo.

Haa, waan ku siin karaa.

<i>Breakfast is at 8 O'clock.</i>	Quraacdu waa siddeedda subaxnimo.
<i>Bring tea at 6:30 A.M.</i>	Shaaha lixda iyo barka keen.
<i>I want some vinegar.</i>	Waxaan rabaa in khal ah.
<i>Don't break anything.</i>	Waxba ha jebin.
<i>Rub the table.</i>	Miiska tirtir.
<i>Clean the curtains.</i>	Daahyada nadiifi.
<i>Dust the furniture.</i>	Maacuunka jafjaf.
<i>Shut the doors.</i>	Albaabbada xir.
<i>That plate isn't clean.</i>	Saxankaasi nadiif ma aha.
<i>Has this water been boiled?</i>	Biyahaan ma la karkariyey?
<i>Is there water in the tin?</i>	Tenegga biyo ma ku jiraan?
<i>Bring some water.</i>	In biyo ah keen.
<i>Make the bed nicely.</i>	Sariirta si fiican u dhig.
<i>Take this letter to him.</i>	Warqaddan u see.
<i>You are very late.</i>	Aad baad u daahday.
<i>Don't forget it.</i>	Ha illoobin.
<i>Remove these chairs to a side.</i>	Kuraasidan gees u qaad.
<i>Light the lamp.</i>	Feynuuska daar.

<i>Put out the light.</i>	Nalka dami.
<i>Make tea and wake me at 6:00 sharp.</i>	Shaah kari oo lixda oo gaw ah i toosi.
<i>Where are my shoes?</i>	Aaway kabahaygii.
<i>Bring me my umbrella.</i>	Dalladdaydii ii keen.
<i>I want hot water in the morning.</i>	Subaxdii biyo kulul baan rabaa.
<i>The lamp needs a new wick.</i>	Feynuusku liifad cusub buu u baahan yahay.
<i>Wash your hands properly.</i>	Gacmahaaga si fiican u dhaq.
<i>Clean the house first.</i>	Horta guriga soo xaaq.
<i>Have you cooked anything yet?</i>	Weli wax ma karisay?
<i>What shall we have for dinner</i>	Maanta maxaynu ku qadaynaa?
<i>I prefer meet than anything else.</i>	Hilib baan wax walba ka Jeclahay.



<i>Call the cook, please.</i>	Kariyaha u yeer.
<i>Do you know to cook well.</i>	Si fiican karinta ma u taqaan?
<i>The fire is gone out.</i>	Dabkii waa damay.
<i>Do you have much charcoal?</i>	Dhuxul badan ma haysataa?
<i>Where is the cook?</i>	Kariyihii <u>aawa</u> ? 
<i>We have plenty of matches.</i>	Tarraq badan baan haysanna.
<i>The oven is not hot.</i>	Foornadu ma kulula.
<i>The water is still cold.</i>	Biyuhu weli waa qabaw yihii.
<i>Can you make a sweet cake?</i>	Doolshe macaan ma samaynkartaa?
<i>We need a large spoon.</i>	Waxaan u baahan nahay qaaddo weyn.
<i>The knives became rusty.</i>	Mindiyihii waa mirireen.
<i>Boil the milk every morning.</i>	Subax kasta biyaha bayli.
<i>Don't spill the milk on the rug.</i>	Caanaha ha ku daadin roogga.
<i>Cover the food.</i>	Cuntada dabool.
<i>Add a little hot water to it.</i>	In yar oo biyo ah ku dar.
<i>Where is the teapot?</i>	Jelamaddii <u>awaay</u> ? 

<i>When the food is ready, dish it up.</i>	Cuntadu markay diyaar noqoto soo gur.
<i>Is the food ready?</i>	Cuntadii diyaar ma tahay?
<i>The food is quite cold.</i>	Cunnadu aad bay u qabawdahay.
<i>I am hungry.</i>	Waan gaajoonayaa.
<i>I am thirsty.</i>	Waan oomanahay.
<i>I want something to eat.</i>	Waxaan rabaa wax aan cuno.
<i>I want something to drink.</i>	Waxaan rabaa wax aan cabbo.
<i>Stir the porridge frequently.</i>	Shurbadda <u>hadba</u> walaaq.
<i>Boil the eggs.</i>	Ukunta karkari.
<i>The fire is too hot.</i>	Dabku aad buu u kulul yahay.
<i>The coffee is very strong.</i>	Qaxwuhu aad buu u culus yahay.
<i>Go and change this 20 shillings note.</i>	Orord 20kan shilin soo sarrif.
<i>What is the price of the eggs?</i>	Ukuntu immisay joogtaa?
<i>The vegetables are very expensive.</i>	Khudraddu aad bay qaali u tahay.
<i>Buy me two sheep's kidneys.</i>	Laba kelyood oo ido ah ii soo gad.
<i>Fill the kettle with water.</i>	Jelamadda biyo ka buuxi.



*Wipe the knives and spoons.*

*Roast the potatoes.*

*Fry the eggs with little butter.*

*Don't waste the butter.*

*Buy me a fat rooster.*

**WITH THE LAUNDRY-  
MAN**

*Washing.*

*Ironing.*

*Do you know ironing.*

*Wash these clothes for me today.*

*Fold the clothes neatly.*

*These clothes are very dirty.*

*Iron this handkerchief immediately.*

*You have not ironed them Well.*

*Change the water once more.*

*The soap has finished.*

Mindiyaha iyo qaaddooyinka tirtir.

Bataatada dub.

Ukunta subag yar ku shiil.

Subagga ha khasaarayn.

Diiq buuran ii soo gad.

**QASAALAHA (Doobbiga)**

Qasaalid.

Kaawiyadayn.

Kaawiyadaynta ma taqaan?

Maanta dharkaan ii mayr (qasaal).

Si giigsan dharka u laab.

Dharkani aad buu wasakh u yahay

Dhaqso masarkan u kaawiya-dee.

Si fiican uma aad kaawiya-dayn.

Biyaha mar kale beddel.

Saabuuntii way dhammaatay.

*Wash these vests and iron them properly.*

*Don't break the buttons.*

*My blankets must be washed today.*

*I must have my shirts washed at 6:30 PM.*

*Two pants are to be washed weekly.*

*You are not a good laundry-man.*

*I'll give you extra money for washing.*

*I'll check your washing.*

*Find me someone to wash my clothes.*

Funaanadahan qasaal oo si fiican u kaawiyadee.

Guluusyada ha jejebin.

Bustayaashayda waa in maanta la qasaalaa.

Waa inaan shaatiyadayda oo dhaqan helaa. 6:30 Fiidnimo.

Toddobaadkiiba waa in laba surweel la qasaalaa.

Qasaale fiican ma tihid.

Dhar-dhaqidda lacag dheeraad ah baan kugu siinayaa.

Sidaad wax u qasaasho ayaan hubinayaa.

Cid dharka ii dhaqda ii keen.

<i>Where is the pain?</i>	Xaggee lagaa hayaa?
<i>I feel very sick.</i>	Aad baan u bukaa.
<i>I feel like vomiting.</i>	Matag baa i haya.
<i>Take these pills.</i>	Kiniiniyadan cun.
<i>When shall I take them?</i>	Goormaan cunaa.
<i>Before you go to bed.</i>	Intaadan seexan.
<i>How shall I take them?</i>	Sidee u cunaa?
<i>Take two of them at a time.</i>	Markiiba laba xabbo cun.
<i>Has the doctor arrived yet?</i>	Takhtarkii weli ma yimid?
<i>Where did he learn medicine?</i>	Xaggee daawada ku baratay?
<i>Doctor's prescription.</i>	Warqad takhtar.
<i>Children don't like injections.</i>	Ilmuhu irbadaha ma jecla.
<i>They like sweet syrups.</i>	Waxay jecel yihiin cabaallada macaan.
<i>He has a fever.</i>	Qandhaa haysa.
<i>Put out your tongue.</i>	Carrabka soo bixi.
<i>I can't sleep well.</i>	Si fiican uma seexan karo.
<i>Call a doctor.</i>	Takhtar u yeer.
<i>I feel better today.</i>	Maanta waa roonahay.

*My son can't eat anything.*

*He has been ill for a long time.*

*My tooth aches.*

*I have pain all over my body.*

*I have no strength.*

*He broke his hand.*

*I have a cold.*

*You are getting very thin.*

*You need a balanced diet.*

*Do you always take much  
Asbro?*

*I Usually perspire when I  
take that Medicine.*

SHORT, EASY  
SENTENCES

*Say it again.*

*Speak up.*

Wiilkaygu waxba ma cuni karo.

In badan buu jirranaa.

Ilig baa i xanuunaya.

Jirka oo dhan baa layga hayaa.

Xoog layguma arko.

Gacan buu ka jabay.

Duray baa i haya.

Aad baad u caatoobeysaa.

Cunno miisaaman baad u baahan taahay.

Asbaro badan ma cuntaa?

Badanaa waan dhidhidaa markaan dawadaas qaato.

WEERO GAAGAABAN OO  
FUDFUDUD

Mar labaad dheh.

Kor u hadal.

<i>Tell me.</i>	Ii sheeg.
<i>Take care of.</i>	Iska jir.
<i>What does he mean ?</i>	Muxuu u jeedaa ?
<i>Little by little.</i>	Tartiib tartiib (inyar inyar).
<i>Run away.</i>	Orod (baxso).
<i>Silence !</i>	Aamus !
<i>You will go alone.</i>	Keligaa baad tegi doontaa.
<i>You will find her at home.</i>	Gurigii baad ka heli doontaa.
<i>Shall I come back soon ?</i>	Ma degdeg baan u soo laab- taa ?
<i>Come back at once.</i>	Degdeg u soo laabo.
<i>Show me that red book.</i>	Buuggaas guduudan i tus.
<i>It is none of my business.</i>	Waxba iigama jiraan; shaqa- day maaha.
<i>There is nothig here.</i>	Halkaan waxba ma yaallaan.
<i>There is some thing in here.</i>	Halkaan wax baa yaalla (ku jira).
<i>I mean this box.</i>	Sanduuqaan baan sheegayaa.

<i>AT THE POST OFFICE</i>	XAFIISKA BOOSTADA
<i>Will you show me where the post office is ?</i>	Ma i tusi karaysaa xafiiska Boostada ?
<i>I have a letter to post.</i>	Warqad baan rabaa inaan diro.
<i>I want to post these letters.</i>	Waxaan rabaa inaan wara- aqahan diro.
<i>The postman brought us letters.</i>	Boostaalihii baa waraaqo noo keenay.
<i>I need some postal stamps, please.</i>	Waxaan u baahanahay waxo- ogaa tigidho ah.
<i>It costs forty cents to send an ordinary letter.</i>	Warqadda caadiga ah afartan sent' baa lagu diraa.
<i>Give me a one shilling stamp.</i>	Tigid hal shilin ah i sii.
<i>It costs 2 Shillings to send a registered letter.</i>	Warqadda ballansan waxa lagu diraa 2 Shilin.
<i>I am sorry, we don't have them.</i>	Waan ka xumahay, ma haynno.
<i>Where is the nearest letter box ?</i>	Sanduuq warqadeed kee ugu dhow ?
<i>Drop your letters in that letter box.</i>	Waraaqahaaga sanduuqaas ku rid.

Here is a letter for you.

A mail arrived this morning.

Let me have your address.

I think there is a letter for you at the post office.

We don't have postman in our town.

I expect a letter from my wife.

When does the mail arrive?

From where?

It arrived yesterday.

I have just received this letter.

What else?

And a paper to read.

## THE SOMALI LANGUAGE & LITERATURE

I speak Somali.

Halkan warqad baa kuu taal.

Saaka boostaa timid.

Cunwaankaaga i sii.

Waxaan u malaynayaa in bo-ostada warqadi kuu tiil. <sup>1/2</sup>

Magaaladeennu boostaale ma leh.

Afadaydii baan warqad ka sugayaa.

Boostadu goormay timaad-  
daa?

Xage e? (meelma)?

Shalay bay timid.

Warqaddan haddaan helay.

Maxaa kale?

Iyo joornaal la akhristo.

## AFKA IYO SUUGAANTA SOOMAALIDA

Af Soomaaliga waan ku hadlaa.

Where did you learn it?

I learned it in my country.

Why do you learn Somali?

Because I intend to go to Somalia.

Because it is a rich language.

I like Somali literature.

I am trying to understand the rich Somali Literature.

Is Somali written?

Yes, it is written in the Latin script.

Then it is easy to learn it.

Can you tell me the most famous Somali poet?

Yes, that is Sayid Mohamed.

Xaggee baad ku baratay?

Dalkayagaan ku bartay.

Af Soomaaliga maxaad u baranaysaa?

Maxaa yeelay waxaan rabaa inaan Soomaaliya aado.

Maxaa yeelay waa af hodan ah.

Waan jeclahay suugaanta Soomalida.

Waxaan isku deyayaa inaan garto suugaanta Soomalida ee hodanka ah.

Af Soomaaligu ma qoran yahay.

Haa, wuxuu ku qoran yahay xarfaha Laatiinka.

Markaas waa sahal in la bartaa. <sup>o e soppetto</sup>

Ma ii sheegi kartaa gabyaaga Soomaaliyeed ee ugu caansan.

Haa, kaasi waa SAYID MAXAMED.



*Was he only a poet ?* Ma gabyaa keliya buu ahaa ?

*No, he was a warrior as well.* Maya, dagaalyahanna wuu ahaa.

*He also was the Dervish Leader.* Wuxuu kaloo ahaa ammaan-duulihii Daraawiishta.

*He fought against England, Italy and Abyssinya.* Wuxuu la dagaallamay Iglan, Talyaani iyo Xabashi.

*When did that happen ?* Taasi goormay dhacday ?

*In the beginning of this century.* Qarnigan bilawgiisii.

*There were also Farah Afad and others.* Waxa weheliyey Faarax Afcad iyo rag kale.

*They were famous for their classical poetry.* Waxay caan ku ahaayeen gabayadoodii heerka sare ahaa.

*Can I get Somali books ?* Buugag Af Soomaali ah ma heli karayaa ?

*You can get them everywhere in Somalia.* Meel kasta oo Soomaaliya ah waad ka heli kartaa.

*Somali is the only official language in this country.* Af Soomaaligu waa afka keliya ee dalkaan rasmiga ka ah.

*It is also the language of instruction.* Sidoo kale waa afka wax lagu barto.

*Thank you very much for this.* Taas waad ku mahadsan tahay.

WORDS AND SENTENCES EREYO IYO JUMLADO

*Above all.* Siiba.

*Above mentioned.* Kor lagu sheegay.

*Therefore.* Sidaas daraadeed

*All the same.* Isku mid.

*As long as I am alive.* Intaan noolahay.

*At length.* Ugu dambeysta. *dambeysta*

*At least.* Ugu yaraan.

*At most.* Ugu badnaan.

*By degrees.* Tartiib tartiib.

*All by myself.* Keligey.

*By this means.* Sidan.

*According to* Iyadoo waafaqsan.

*Since then.* Taniyo goortaas.

*So and so.* Hebel hebel.

*That is to say.* Waxaan u jeedaa.



<i>The other day</i>	Ayaan dhaweyd.
<i>Vice versa.</i>	Sida kale.
<i>You are requested to.</i>	Waxa lagaa codsanayaa innaad.
<i>As well.</i>	Sidoo kale.
<i>As yet.</i>	Taniyo haddeer / weli.
<i>No smoking.</i>	Sigaarku waa reebban yahay.
<i>No entrance.</i>	Lama geli karo.
<i>Do you mind my smoking.</i>	Inaan sigaar cabbo maxaad ka qabtaa ?
<i>Go on with your work.</i>	Hawshaada wado.
<i>They set off today.</i>	Maanta ayey tageen.
<i>Make out the bill.</i>	Xisaabtii soo samee.
<i>I can't understand that word.</i>	Eraygaas ma garan karo.
<i>Pick up that letter.</i>	Warqadaas qaad.
<i>Wind up your watch.</i>	Saacaddaada buuxi.
<i>Hang up that picture.</i>	Masawirkaa meel sur.
<i>Wait for me till tomorrow.</i>	Taniyo berri i sug.
<i>Do you know his whereabouts ?</i>	Meel uu jiro ma taqaan ?

*I wish I have been there.*

*I took him by surprise.*

*Is Ahmed up ?*

*That is of no use.*

*Make room, please.*

*Nothing can be better.*

*He was dead drunk.*

*The time is up.*

*He is penniless.*

*Don't bother me.*

Waxaan jeclaan lahaa inaan halkaas joogo.

Waan ku soo kediyey.

Axmed ma soo jeedaa ?

(Taasi) faaido ma leh.

Jaalle ii bannee.

Wax ka fiican ma jiraan.

Aad buu u sakhraansanaa.

Waqtigii waa dhammaaday.

Kumi lagama oga.

Ha i labin.

**RELIGIOUS TERMS**

<i>Religion.</i>	Diin.
<i>God.</i>	Eebbe, Ilaah.
<i>Creator.</i>	Abuure.
<i>Prophet.</i>	Nebi.
<i>Angel.</i>	Malag (Malaa'.
<i>Devil.</i>	Shaydaan.
<i>Hell.</i>	Naar; cadaab.
<i>Paradise.</i>	Janno.
<i>Ablution.</i>	Weyse.
<i>Circumcision.</i>	Gudniin.
<i>Pure, clean.</i>	Daahir.
<i>Idolatry.</i>	Sanamcaabud.
<i>Mysticism.</i>	Suufinnimo.
<i>A mystic.</i>	Suufi.
<i>Fasting.</i>	Soon.
<i>Prayer.</i>	Salaad: tukasho.
<i>Pilgrimage.</i>	Xaj.
<i>Amulet.</i>	Xirsi; qardhaas.

**ERAYO DIIMEED**

<i>Sanctity</i>	Seko.
<i>Alms.</i>	Sadaqo.
<i>Martyrdom.</i>	Shahiidnimo.
<i>Martyr.</i>	Shahiid.
<i>Testimony.</i>	Ashahaado.
<i>Sermon.</i>	Wacdi.
<i>Benevolence.</i>	Samafal.
<i>Doomsday.</i>	Aakhiro.
<i>Prayer niche.</i>	Mixraab.
<i>Church.</i>	Kiniisad.
<i>Christian.</i>	Kiristaan.
<i>Mosque.</i>	Masaajid.
<i>Fear of God.</i>	Cabsi Eebbe.
<i>Feast.</i>	Iid.
<i>Doctrine.</i>	Mad-hab.
<i>The Koran.</i>	Quraanka.
<i>Verse.</i>	Aayad.
<i>Chapter.</i>	Suurad.
<i>Faith.</i>	Iimaan.
<i>Fast breaking.</i>	Afur.

<i>Worship.</i>	Cibaado.
<i>Explanation.</i>	Tafsiir.
<i>Invocation.</i>	Duco.
<i>Imprecation.</i>	Habaar.
<i>Apostate.</i>	Murtad.
<i>Bier.</i>	Naxash; rarrab.
<i>Genitals.</i>	Cawro.
<i>Redeem.</i>	Soo furasho.
<i>Carrion.</i>	Bakhti.
<i>Polyathiest.</i>	Mushrik (shariik).
<i>Prediction.</i>	Kaahinnimo.

**DISEASES AND REMEDIES**

**CUDURRADA IYO  
DAAWADA**

<i>Fever</i>	Qandho; Xummad.
<i>Cough</i>	Qufac.
<i>Wound</i>	Nabar; Daqar.
<i>Cut.</i>	Dhaawac.
<i>Operation</i>	Qalliin.
<i>Whooping cough.</i>	Kix; jixdheer

<i>Measles.</i>	Jadeeco.
<i>Consumption.</i>	Qaaxo; feero.
<i>Cholera.</i>	Daacuun; koleera.
<i>Syphilis.</i>	Waraabaw; Xabbad; Bajo.
<i>Small pox.</i>	Furuq.
<i>Contagious diseases.</i>	Cudurrada faafa.
<i>Cold.</i>	Duray; hargab.
<i>Relapse.</i>	Qumbacasho.
<i>Humpbacked.</i>	Tuurre.
<i>Baldhead.</i>	Bidaar.
<i>Deaf.</i>	Dhegoole.
<i>One eyed.</i>	Iley.
<i>One armed.</i>	Gacamey.
<i>Lame.</i>	Lugey.
<i>Blind.</i>	Indhoole.
<i>Epilepsy.</i>	Sarco.
<i>Paralysis.</i>	Qallal.
<i>Plague.</i>	Daacuun.
<i>Rheumatism.</i>	Tuf.
<i>Constipation</i>	Calool-qallal.

*Syrup.*

**Poison.**

*Ointment.*

**VOCABULARY: HUMAN  
BODY.**

*Body.*

*Head.*

*Hair.*

*Face.*

*Eye; eyes.*

*Ear; ears.*

*Mouth.*

*Tongue.*

*Ribs.*

*Backbone.*

*Wrist.*

*Brain.*

*Cerebellum.*

**Shuban**

**Cabaal.**

**Sun.**

**Dhaymo; boomaato.**

**ERAYO: JIRKA DADKA**

**Jir; Oogo.**

**Madax.**

**Timo.**

**Weji**

**Il; indho.**

**Dheg; dhego,**

**Af.**

**Carrab.**

**Feero.**

**Lafdhabar.**

**Cumaacun.**

**Maskax.**

**Maskaxyaro**

*Forehead.*

*Hand.*

*Eyeball.*

*Eyebrows.*

*Eyelids.*

*Cheeks.*

*Nose.*

*Nostrils.*

*Tooth; teeth.*

*Grinders.*

*Wisdom tooth.*

*Incisors.*

*Gum.*

*Salivary glands.*

*Chin.*

*Beard.*

*Mustache.*

*Neck.*

*Jaw.*

*Nape.*

**Fool.**

**Gacan.**

**Isha birteeda;**

**Sunniyo.**

**Galalka indhaha.**

**Dhafoorro; dhabanno.**

**San.**

**Dulal.**

**Ilig; ilko.**

**Gawso.**

**Gaws dambeed.**

**Foolol.**

**Cirrid.**

**Qanjirrada calyada.**

**Gar.**

**Gar.**

**Shaarub.**

**Luqun; qoor.**

**Fuq.**

**Jeego.**

<i>Throat.</i>	Hunguri; cune.
<i>Shoulder.</i>	Garab.
<i>Arm.</i>	Dhudhun; (gacan).
<i>Armpit.</i>	Kilkilo
<i>Elbow.</i>	Xusul; (suxul).
<i>Knee.</i>	Law: Jilib.
<i>Palm.</i>	Calaacal.
<i>Nail.</i>	Ciddi.
<i>Finger.</i>	Far.
<i>Thumb.</i>	Suul.
<i>Forefinger.</i>	Murugsato (Murdiso).
<i>Middle finger.</i>	Fardhexo.
<i>Fourth finger.</i>	Faadumo.
<i>Knuckles.</i>	Faryaro.
<i>Little finger.</i>	Xubnaha faraha.
<i>Joints.</i>	Kalagoosyo.
<i>Chest.</i>	Laab; xabad.
<i>Breast.</i>	Naas.
<i>Nipple.</i>	Ib.
<i>Lung.</i>	Sambab,

<i>Heart.</i>	Wadne.
<i>Artery.</i>	Halbawle.
<i>Blood.</i>	Dhiig.
<i>Veins.</i>	Xididdo.
<i>Stomach.</i>	Calool.
<i>Bladder.</i>	Kaadihays.
<i>Navel.</i>	Xuddun.
<i>Back.</i>	Dhabar.
<i>Side.</i>	Dhinac.
<i>Kidneys.</i>	Kelvo.
<i>Liver.</i>	Beer.
<i>Spleen.</i>	Beer kayaro (Beeryaro).
<i>Buttocks.</i>	Salal (sino).
<i>Sexual organs.</i>	Xubnaha dhalmada.
<i>Womb.</i>	Ilmaside.
<i>Testicle.</i>	Xiniin.
<i>Penis.</i>	Gus.
<i>Thigh.</i>	Bawdo.
<i>Leg.</i>	Lug.
<i>Foot; feet.</i>	Cag; cago.



<i>Heel.</i>	Cirib.
<i>Muscles.</i>	Muruqyo.
<i>Skin.</i>	Harag; maqaar.
<i>Ear-wax</i>	Dhukay.
<i>Fus.</i>	Malax.
<i>Tears.</i>	Ilmo.
<i>Sweat.</i>	Dhidid.
<i>Urine.</i>	Kaadi.
<i>Menstruation</i>	Caado.
<i>Semen.</i>	Xawo.

**POLITICAL TERMS**

ERAYO SIYAASADEED

<i>President</i>	Madaxweyne.
<i>Secretary.</i>	Xoghaye.
<i>Minister.</i>	Wasiir.
<i>Advisor.</i>	Lataliye.
<i>Foreign affairs.</i>	Arrimaha Dibedda.
<i>The United Nations Organization.</i>	Jameiyadda Qoruumaha Mi- doobey.
<i>The security council.</i>	Golaha Ammaanka.

<i>Secretary General.</i>	Xoghayaha Guud.
<i>Delegation.</i>	Wafdi.
<i>Envoy.</i>	Ergey.
<i>Ambassador.</i>	Danjire; Safiir.
<i>African Unity.</i>	Midowga Afrika.
<i>Colonialism.</i>	Gumeysi.
<i>Liberation movement.</i>	Dhaqdhaqaaq Gobannimado- on.
<i>The middle east.</i>	Bariga dhexe.
<i>The far east.</i>	Bariga fog.
<i>Western Europe.</i>	Orobbada galbeed.
<i>Revolution.</i>	Kacaan; Tawrad.
<i>Summit Conference.</i>	Shir madaxeed.
<i>Capitalism.</i>	Hantigoosad.
<i>Socialism.</i>	Hantiwadaag.
<i>Communism.</i>	Shuuci.
<i>Political borders.</i>	Soohdimo Siyaasadeed.
<i>Agreement.</i>	Heshiis.
<i>Treaty.</i>	Wacad.
<i>Constitution.</i>	Distuur.

<i>Leadership.</i>	Hoggaamin.
<i>Apartheid.</i>	Midabtakoor.
<i>Office.</i>	Xafiis.
<i>Interior office.</i>	Xafiiska Arrimaha Gudaha.
<i>Administration.</i>	Maamul.
<i>Directorship.</i>	Agaasimid.
<i>Party.</i>	Xisbi.
<i>Charge d'affairs.</i>	Siihaye.
<i>King.</i>	Boqor.
<i>Queen.</i>	<b>Boqorad.</b>
<i>Nationalist.</i>	Waddani.
<i>Revolutionary.</i>	Tawri.
<i>Revisionist.</i>	Dibusocod.
<i>Big powers.</i>	Dawladaha waaweyn.
<i>Joint communiqué</i>	War loo dhan yahay.
<i>Conspiracy.</i>	Mu'aamarad.
<i>Demonstration.</i>	Bannaanbax, Mudaaharaad.
<i>Economic aid.</i>	Gargaar dhaqaale.
<i>Political support.</i>	Taageero siyaasadeed.
<i>Military aid.</i>	Gargaar askareed.

<i>Neo-colonialism.</i>	Gumeysiga cusub.
<i>Black Afrika.</i>	Afrikada madaw.
<i>Black movement.</i>	Dhaqdhaqaaqa dadka madaw.
<i>Political relations.</i>	Xiriir siyaasadeed.
<i>Diplomatic relations.</i>	Xiriir dibloomaasi.
<i>Nationalization.</i>	Tolayn (lawareegid).
<i>The Organization of African Unity.</i>	Ururka midowga Afrika.
<i>The European Common Market.</i>	Suuqa Oroobba ka dhexeeya.
<i>Political refuge.</i>	Magangal siyaasadeed.
<i>National unity.</i>	Wadajirka dalka.
<i>East Africa.</i>	Afrikada bari.
<i>Hijacking.</i>	Afduubid.
<i>Air piracy.</i>	Burcadnimada cirka.

*A liar is a sorcerer.*

Nin been yaqaan waa nin fal yaqaan.

*He who said, "I", has distinguished himself from others.*

Nin aní yiri dad iská soóc.

*He who does not prepspire eats not his fill.*

Nimaan dhididini ma dhergo.

*He who used to be mad is not to be talked of insanity.*

Nin waalan jiray waalli loogama sheekeyo.

*(An already) drenched person does not restrain himself from water.*

Nin qoyani biyo iskama dhowro.

*Flowing water make the stagnant water move.*

Biyo socdaa biyo fadhiya kiciya.

*Of people's actuality just a ruler and a begger could tell.*

Dad nin u taliyey iyo nin tuugay baa yaqaan.

*He who warned you has not killed you as yet.*

Nin kuu digay kuma dilin.

*Either have patience for women or dispense with them.*

Naago ama u samir ama ka samir.

*A wise man is not openly sent away, but is shown a reason for it.*

Nin weyn tag lama yiraahdee wuxuu ku tagaa la tusaa.

*Don't get up for a person Whom you can defeat while sitting down.*

Nimaad fadhi kaga adag tahay looma sare joogsado.

*A wise man can forecast the reason for his death.*

Nin weyn wedkiis waa yaqaan.

*Birds of feathers fly together.*

Shimbirba shimbirkiisuu la duulaa.

*One who praises himself is like a she-goat that suckled itself.*

Nin isfaanshey waa ri isnuugtay.

*Poverty makes you beg your foe.*

Baahi nin kuu daran bay kuu geysaa.

*The humpbacked knows how to sleep.*

Nin tuur lihi si uu u seexdo waa yaqaan.

*An elderly man has better experience.*

Nin gu' kaa weyn garashana kaa weyn.

*Everybody gets the benefits of his savings.*

Qof waliba wuxuu dhigtuu dheefsadaa.

*Let us negotiate means let us agree.*

Aan wada hadallo waa aan heshiinno.

*A leopard's baby is not taken (i.e. is never tamed).*

Ilmo shabeel lama qaato.

*A dead man's shoes, are better than him.*

Nin dhintay kabihisaa dhaama.

*A badly veiled man is thought to be hiding a thing.*

*One cannot stroke (of his body) a place higher than his head.*

*A sick man is not highly spirited.*

*Vomiting is a sign of sickness.*

*Pull my hands and let me pull yours is just tiring hands.*

*Two different things cannot be thought of in a time.*

*Relying on it's mother's kindness, a young donkey suckles the former's teats from behind.*

*Even his mother gives him nothing to whom who does not ask for.*

*While in it's old hole, a rabbit searches for a new one.*

*Of men three are the worst: He who doesn't patch up his clothes, he who is irresolute and he who doesn't economize.*

Nin hullaab xumi wax inuu qarsanayaa la moodaa.

Madax ka kor meel la salaaxo ma leh.

Nin bukaa ma billa.

Bushi maraggii waa matag.

I jiid aan ku jiidec waa gacmo daalis.

Laabi labá u lá'.

Dameeri isku hallayn bay hooyadeed dabada uga nuugtaa.

Nimaan hadlan habartiina wax ma siiso.

Bakayle intuu bur ku jiruu bur daydaydaa.

Rag saddex baa ugu liita: Ma toshe, ma tashade iyo ma tashiishe.

*A sanke is to be killed right on the head.*

*He who can't foresee the future, cannot comprehend of the present.*

*He who cannot resist a saying cannot stand for a spear.*

*He who is swept away by a torrent would even lean against the foam.*

*(people) could not beat a hayena with a stick and slandering it is of no avail.*

*He who is unaware of his interests gets destroyed before a ragged cloth wears out.*

*Both truth and teeth are whitened.*

*A ram sees not the sky unless it is slaughtered.*

Mas madaxaa laga dilaa.

Nimaan waxa soo socda garani waxa jooga ma garto.

Nimaan weer sugini waran ma sugo.

Nin daad qaaday xumbo cuskay.

Waraabe ulna lala gaari waa crayna wax lagaga guri waa.

Dantiisa-mooge maro duuga horteeduu dhammaadaa.

Run iyo ilkaba waa la caddeeyaa.

Wan weyn ilaa la gawraco indhihiisu cirka ma arkaan.



## GENERAL DATA ABOUT SOMALIA

Chairman of the Revolutionary Council, Maj. Gen. Mohamed Siyad Barre.

Geographical location: Eastern horn of Africa.

Land area : 262.000 sq.miles. \*

Borders : Kenya, Abyssinya and French Somaliland.

Population : 4.5 million (estimated 1971). \*

Official language : Somali

Rivers: Jubba and Shabelle.

Inhabitants' main occupation: Livestock raising and agriculture.

Main export trade: Livestock, skins, hides and banana crop.

Date of independence : July 1, 1960.

Flag: Five-pointed white star on blue ground.

Date of the birth of the revolution: October 21st, 1969.

Capital: Mogadishu (on the Indian Ocean).

Other major towns: Hargeisa, Kismayu, Baidoa and Bur'o

Currency : Somali shilling (So. Sh.).

National day : Oct. 21.

---

\* Taken from : *Beautiful Somalia, Paris 1971.*

\* From the same source.



CORRECTION

In the Introduction of this Book, there is a misprint in the sentence that reads "After being officially written & firstly introduced in 1973 ----- "

The Somali Language was officially introduced in 1972 and not in 1973 as above.

---

Waxaa lagu daabacay  
Wakaaladda Madbacadda Qaranka  
Muqdisho, 1975

---